



## Guddiga ayaa ansixiya jadwalka dugsiga ee 2019-20

Sannad-dugsiyeedka 2019-20 ee Dugsiyadda Dad weynaha ee Portland ayaa bilaaban doona Arbacada, Agoosto 28, oo ay dhammaan doonto (maalmaha kabida cimilada xun) jimcaha, Juun 5.

Taasi waxay noqotay rasmi habeeynimadii Talaadada markii ay Guddiga Waxbarashada ee PPS soo go'aamiyeen 5821, oo uu ansixiyay Kormeeraha Guadalupe Guerrero ee soo jeedinta jadwalka dugsiga ee 2019-20. Jadwalka waxaa loogu soo bandhigay Guddiga kulankoodi 15-kii Jannaayo, iyada oo talooyinka dadweynaha lagu martiqaaday muddada ka horeysa codeynta kama dambaysta Guddiga ah ee talaadada.

Ujeeddada Kormeeraha Guud ee jadwalka, ayay ku wargeliyeen shaqaaluhu iyo talooyinka bulshada, inay ahayd in la abuurdo jadwal arday oo diirada saaraya saaxibtinimo qoys.

“Jadwalkan wuxuu sii wadi doonaa in uu tirtiro bilaw dambe iyo ruqsaynta hore iyo in si wanaagsan loo hubiyo shan maalmood oo casharo oo buuxa la qaato ee usbuuca caadiga ah,” ayuu dhahay.

Jadwalku wuxuu isku dheellitiraa maalmaha casharrada ah ee katirsan simistarka iyo rubucyada, ee afartii rubcood midkiiba leh 42 ilaa 47 maalmood. Waxay sidoo kale sii wadaysaa maalmaha qorshaynta macalimiinta inta badan Isniinta iyo Jimcaha si looga fogaado fasaxyada ardayda bartamaha isbuuca.

Jadwalku wuxuu hayaa dhowr astaamo ee 2018-19, oo ay ku jiraan usbuuc dhamaystiran oo waxba la aqrisanaynin inta lagu jiro usbuuca Mahad celinta, shirarka waalidiinta iyo macalimiinta ee Isniinta iyo Talaado, Noofeembar 25 iyo 26; dugsiyada ayaa la xidhi Arbacada, Noofeembar 27; iyo sida caadiga ah khamiista iyo jimcaha si loo tago Mahad celinta.

Jadwalka ayaa mar kale sii wado Maalinta Madaxweynayaasha, ee ah Isniinta, Febraayo 17, oo ah maalinta kabista barafka, oo ah 18-ka Jannaayo ee ugu dambeeyay si loogu magacaabo. Saddexda toddobaad ee ugu horeeya ee ka dambeeya jadwalka 5-ta bisha Juun - Isniinta-Arbacada, Juun 8-10 - ayaa loo qabtaa maalmaha kabista barafka, haddii loo baahdo.

Fasaxa xilliga gu'ga ee bisha Maarso 23-27, ayaa mar kale la isku dayi doona si loogu hagaajiyo fasaxyada jaamacadaha maxaliga ah si qoysaska walaalaha da'da weyn iyo ardayda qaadanaaya tababarka jaamacadda ee ka shaqeeya dhismayaasha PPS ay uhelaan fasaxyo isku aadan.